# Foomka Heshiiska Daynta Teknoolojiyadda

Degmo Dugsiyeedka Edina 273 (ISD 273) waxay heshiiskaan la galaysaa:

____________________________ iyo ____________________________

(Arday) (Daryeel bixiyaha)

Barnaamijka daynta qalabka waxaa loogu tala galay in sare loogu qaado guusha ardayga asaga oo balaarinaya sarena u qaadaya helitaanka teknoolojiyadda, kordhinaya awoodda wada shaqaynta, hagaajinayana hal abuurka ardayda ee jawiga waxbarashada.

**Tafaasiisha Qalabka* La isdayminayo**

ISD 273 waxay ardayda: siinaysaa

1. hal (1) Qalab Waxbarasho (tusaale: Chromebook ama iPad)
2. Fiilada korontada

***Guud ahaanba Heshiiska, "qalabka" waxaa la fahamsanahay in ay kujiraan dhammaan alaabta ku qoran qaybta kore "Description of Loaned Property"("Tafaasiisha Qalabka La daymiyay"). "Qoys" waxaa loola jeedaa Daryeel bixiyaha kor ku qoran.**

**Qodobada Heshiiska**

Heshiiskani waxa uu bilaaban doonaa taariikhda saxeexa elegtarooniga ah,waxana uu dhamaan doona ka dib marka qalabka lagu soo celiyo dugsiga. Heshiiskan waxa la cusboonaysiiyaa sannad kasta ardaygu waa la diiwaan geliyaa ISD 273.

**ISD 273 Waxay aqbashay in:**

1. Bixiso qalab si wanaagsan u shaqaynaya marka ay keenayso.
2. Ay ka baarto wax cilido dhanka shaqada ah ayna sheegto hababka dayactirka.
   Arrimahaan waxaa kujira laakiin aan ku ekayn:
   a. Wax ka badalidda habka hanaanku kusoo baxay
   b. dayactir gaynta qalabka, marka ay qofka daynsanaya siinayso
   c. Bixinta qiyaasta dayactirka qalabka waxyeeloobay

**Macluumaad Dheeraad ah**

- Waxyeelada qalabka waxaa ka dhalan karta in qofku waayo isticmaalka qalabka.
  - Marka ay dhacdo in qalabku lumo ama uu waxyeeloobo, ISD 273 waxay go'aamin doontaa kharashka iyo waajibaadka qoyska ee ku saabsan waxyeelo kasta oo qalabka soo gaarta.
- Ardaydu waxay macluumaadkooda heli doonaan marka ay galaan qalab kasta oo ay ISD 273 leedahay.
- ISD 273 waxay go'aamin doontaa in waxyeeladu ka dhalatay dayac, taasoo burinaysa heshiiskaan.
- Fasalada qaarkood, agabka difaaca qalabka waxaa bixiya ISD 273 si loo yareeyo burburka. **Agabka ilaalinta ayaa looga baahan yahay inuu ku sii jiro qalabka.**

**Qoyska iyo Ardaygu waxay Aqbalayaan in:**

- Ay ka ilaaliyaan qalabka waxyeelada feegaarka ah, sida istiikarada, in ay wax ku dul qoraan, riinjiga, xoqista, iwm.
- In ay xafidaan dhammaanba foomamka aqoonsiga. In aysan ka baabi'in lambarka gaarka ah, koodhka, iwm.
- In ay qalabka u hayaan qaab taxaddar leh oo sax ah, ayna mas'uul ka yihiin lumitaanka iyo waxyeelada qalabka soo gaarta.
- Qaado mas'uuliyadda ilaalinta isticmaalka ardayga ee qalabka guriga, raac tilmaamaha ISD 273 ee Siyaasadda 524 - Isticmaalka Elektaroonigga ah ee la Aqbali karo .
- Ku soo celi qalabka xarunta warbaahinta dugsiga ama goobta loo qoondeeyay ka hor intaan la diiwaan gelin ISD 273.
- Qalabku waa, mar kastana ahaanayaa, hanti u gaar ah ISD 273. Qoysku kuma lahan wax xaquuq, mansab ah, ama dan ah, oo aan ka ahayn inta ku qoran Heshiiskaan.
- In ay la soo xiriiraan Xarunta Warbaahinta dugsigooda marka dhibaato ku timaaddo qalabka.
- Qoysku wuxuu aqbalayaa in uu u hogaansamayo uuna xaqiijinayo dhammaanba shuruucda qaranka, kuwa gobolka, iyo kuwa magaalada iyo shuruucda kaleba, xeerarka iyo nidaamyada la xiriira haysashada, isticmaalka, iyo ilalainta qalabka.
- Qoysku wax mas'uuliyada ha uma raacan karo ISD 273 iyo wakiiladeeda taasoo ku saabsan wax cabasho, ficil, maxkamadayn, dacwo, kharashaad, lacag ku bbaxda, waxyeelooyin iyo mas'uuliyado ah, oo ay kujiraan kharashka garyaqaanka iyo kharashaadka soo baxa, ee la xiriira ama ka dhasha qalabka, isticmaalka qalabka, ama Heshiiskaan, oo ay kujirto laakiin aan ku koobnayn, soo saarista, keenista, haysashada, isticmaalka, shaqada, ama soo celinta qalabka.
- **In ay aqbalaan bixinta dhammaan kharashaadka dayactirka, kuwaas oo laga yaabo in uu noqdo mid is gaargaara**
  - **$30 khidmad**
    - Burbur jirka ah (dayactir/beddelka suunka jabay, kiiboodhka, kiis, iwm.).
    - Beddelka qalabyada (xadhka korantada ama agabka difaac).
    - Waxyeellada la isku qurxiyo (istiikaro, xardho, calaamado).
    - Ka saarista sumadaha degmada (lambarka gaarka ah ama koodhka degmada).
  - **$50 khidmad** ah oo lagu hagaajinayo ama lagu beddelayo shaash jaban ama jaban.
  - **Ilaa $400** oo kharash ah oo ah kharashka beddelka qalabka oo dhan.

**XASUUSINO:**

- ISD 273 ma beddeli doonto stylus lumay/dhaawacmay/xaday.
- Khaladaadka waxyeelaynta ah ee lagu soo celceliyo waxay keeni karaan ganaaxyo dheeraad ah.
- Kharashyada waxaa lagu dari doonaa akoonnada Campus Fees ee qoyska.

**Heshiisyada Dheeraadka ah**

Qoysku wuxuu fahamsan yahay in ku xadgudubka shuruudaha kore ay ka dhalan doonto in Ardayga laga qaado qalabka.

**Saxiixa**

_________________________________ Aqoonsiga Ardayga___________ Taariikhda ____________
Arday

__________________________________ Taariikhda _______________
Daryeel bixiyaha ka Mas'uulka ah Ardayga

Updated: June 2025